- Nadiifi sagxadaha, saliyada, iyo dusha meelaha si aad uga hortagto in saliid, dufan iyo qashin ku dul dhismaan.
- Adeegso qaababka qalalan sida xaaqista, tirtirista, hawo gelinta, ama sifaynta waxyaabaha daata si aad u dhaqdo sagxadaha, saliyada, iyo dusha meelaha.
- Yaree ama si sax ah qashinka ugu dar dhammaan biyaha wasaqda dhaqmada ee ka yimaada shaqooyinka dhaqmada.



Biyaha ka yimaada tirtiraha iyo gardeelka ayaa lagu shubaa siinka tirtirista.

Sawirka: Ismaamulka San Diego

Jawaab celinta daadashada

- Iskuday inaad abuurto qorshaha jawaab celinta daadashada.
- U tababar shaqaalaha qaababka wanaagsan ee nadiifinta wasaqda.
- Adeegso agabka biyaha dhuuqa iyo qaababka qalalan sida xaaqista, tirtirista, hawo gelinta, ama sifaynta waxyaabaha yaryar ee daata. Ku shub qashinka qasaca qashinka oo ku habboon.
- Xogta kale ee jawaab celinta daadashada ka fiiri Qaybta Waxyaabaha Daata ee dhabarka danbe ee buuggaan tusmada.

*Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybaha Xeerka Ilaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego
67.806(a)(b)(d);67.808(a)(5) ;(a)(7)(A) ;(a)(6).*



Shiilin ka Jarida iyo U qubaynta Xoolaha

Qaab dhismeedka Goobta

- Ka samee goobaha dhogarta iyo dhaqista xoolaha meelo kafog marinnada biyaha daadka ama goobaha biyaha. Haddii aysan macquul ahayn, ka ilaali marinnada ama goobaha biyaha.
- Ku dhaq xoolaha keliya aaga llaalinta leh ee loo asteyay ama meel biyaha dhaqmada la qabanaayo ama la leexinaayo.
Qaababka qabashada iyo leexinta bulaacada waxaa ku jiri kara: rako leh tuubooyinka bulaacada qaada, taangi wasaqda qabta, kala soocaha saliida/biyaha, BMP kale oo daawada xakameeya, ama tuubada ku xiraysa bulaacada oo sharci ah.
- Marka biyaha dhaqista ay ku kululaan karaan tuubooyinka bulaacada qaada, si joogto ah uga nadiifi waxyaabaha adkaha ah si aad uga hortagto buux dhaafka.
- Biyaha dhaqmada waa in lagu leexshaa nidaamka bulaacada ee la ogol yahay ama nidaamka qashinka biyaha.
- Biyaha dhaqmada ama biyo raaciska ayaa logu daadin karaa meelaha dhulka la falay haddii meesha dhulka la falay ah aysan gaarayn nidaamka biyaha roobka ama goobaha biyaha.



*Aaga la asteyay ee
xoolaha lagu dhaqo waxaa
laga dhigaa meel ka fog
marinka biyaha roobka iyo
goobaha biyaha.*

*Sawirka: Ismaamulka
San Diego*

Kaydka iyo Dayactirka Goobta

- Si joogto ah u xaaq oo dhaq wasaqda xoolaha iyo aaga loogu qubeeyo.
- Aruuri oo qashinka kudar saalada, cuntada, iyo waxyaabaa kale ee sumayn kara biyaha daadka si waafaqsan sharciyada iyo xeerarka maxaliga ah.

Jawaab celinta daadashada

- Iskuday inaad abuurto qorshaha jawaab celinta daadashada.
- U tababar shaqaalaha qaababka wanaagsan ee nadiifinta wasaqda.
- Adeegso agabka biyaha dhuuqa iyo qaababka qalalan sida xaaqista, tirtirista, hawo gelinta, ama sifaynta waxyaabaha yaryar ee daata. Ku shub qashinka qasaca qashinka oo ku habboon.
- Xogta kale ee jawaab celinta daadashada ka fiiri Qaybta Waxyaabaha Daata ee dhabarka danbe ee buuggaan tusmada.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybaha Xeerka Ilaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego

67.806(a)(b)(d);67.808(a)(5);(a)(7)(A);(a)(6);(a)(9).

Aagaga iyo Shaqooyinka Guud ee Banaanka

Dayactirka Dhismaha iyo Garoonnada

Shaqooyinka Falida Dhulka

Qaab dhismeedka Goobta

- Si sax u joogtee BMP yo kasta oo loo adeegsado Ilaalinta marinnada biyaha roobka/goobaha biyaha ama daboolaaya ama xakamaynaaya. Badel ama kordhi BMP yada marka loo baahdo.



Dagaandega waxaa lagu difaacaa dhoobo, duubab fibar ah, iyo aag difaac geedo lagu beeray.

Sawirka: Michael Baker International

Kaydka iyo Dayactirka Goobta

- Kahortag daadashada, dilaacyada, iyo adeegsiga xad dhaafka ah ee maadooyinka kiimikada inta lagu jiro shaqooyinka hagaajinta dhulka.
- Kahortag waraabinta xad dhaafka ah ee aaga dhulka la falay.
- Xakamee ka badinta sunta cayayaanka, dhirta cayayaanka, iyo bacrimiyaha. Ha buufin inta lagu jiro xili dabayleedka.
- Haku shubin sunta cayayaanka meel 100 fiid uga dhow goobaha biyaha.
- Si sax ah u ilaali beeraha.
- Si joogto ah uga saar meesha qashinka xoolaha.
- Difaac meelaha taaga ah iyo goobaha u nugul nabaad guurka ciida (tusaale, adeegso duubabka fibarka, jaawano ciid iyo jaay ah).
- Si joogto ah u gur oo qashinka ugu dar wasaqda, qashinka, alaabaha adag (caleenta, cawska la jaray, iwm.), iyo agabka kale.

Jawaab celinta daadashada

- Aaga shaqada ee furan waa in la nadiifiyo maalin kasta ayadoo la adeegsanaayo qaababka nadiifinta ee qalalan sida xaaqista, tirtirista, haawinta, iyo sifaynta.
- Qaababka nadiifinta qoyan, sida biyaha tuubada, waa in keliya la adeegsadaa haddii taxadar la sameeyay si looga hortago in biyaha dhaqmada ama wasakhdu gasho nidaamka biyaha ama baraha biyaha.
- Iskuday inaad abuurto qorshaha jawaab celinta daadashada.
- U tababar shaqaalaha qaababka wanaagsan ee nadiifinta wasaqda.
- Xogta kale ee jawaab celinta daadashada ka fiiri Qaybta Waxyaabaha Daata ee dhabarka danbe ee buuggaan tusmada

Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybaha Xeerka Ilaalinta

Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego

67.806(a)(b)(d);67.808(a)(5) ;(a)(7)(A) ;(a)(9)(B).

Sunta Cayayaanka, Geedaha Cayayaanka, iyo Bacrimiyaasha beeraha

Qaab dhismeedka Goobta

- Samee shaqooyinka iskudarka sunta cayayaanka adoo jooga gudaha guri ama meel daboolan.
- Ku samee qaabaynta sunta cayayaanka ama maadooyinka kale ee kiimikada ah meelo kafog marinnada biyaha roobka ama goobaha biyaha. Haddii aysan macquul ahayn, ka ilaali marinnada ama goobaha biyaha.



*Sunta cayayaanka waxaa la
gashaa meel xiran oo
amaan ah.*

*Sawirka: Ismaamulka
San Diego*

Kaydka iyo Dayactirkha Goobta

- Ku haay kunteenarada maadooyinka xaalad wanaagsan, adoo si fiican u xiraaya marka aan la isticmaalayn, una kaydinaaya qaab ka difaacaaya inay taabtaan biyaha daadka.
- Adeegso farsamooyinka Maaraynta Isku dhafan ee Cayayaanka (IPM) iyo qaababka kale ee xakamaynta cayayaanka ee aan kiimikada adeegsanayn (tusaale, xanibaadaha, xanjada qabanaysa, nalalka korontada qabanaysa cayayaanka).
- Sunta cayayaanka, bacrimiyaasha, iyo maadooyinka kale ee kiimikada waa in loo adeegsadaa laguna daraa qashinka si waafaqsan tilmaamaha ku qoran maadada, xaashida xogta badqabka agabka, iyo sharciyada iyo xeerarka khuseeya ee federaalka, gobalka, iyo kuwa maxaliga ah.

Kaydka iyo Dayactirka Goobta

- Ka fakar cimilooyinka jira iyo jadwallada waraabinta kahor intaadan banaanka ku shubin bacrimiyaasha iyo sunta cayayaanka.
- Ha marinin bacrimiyaasha iyo sunta cayayaanka inta lagu jiro xiliyada dabayshu jirto ama kahor xiliga waraabka iyo roobka.
- Adeegso qaababka saxda ah (tusaale, ku shibista waqtii cayiman, iskudarka siidaynta tartiibta ah iyo bacrimiyaha dareeraha ah ee caadiga ah) si aad uga hortagto bacriminta xad dhaafka ah.
- Ku shub meelaha ayadoo qaybo yaryar halkii aad halmar wax badan ku shubi lahayd. Tani waxay u sahlaysaa kiimikooyinka inay falgalaan lagana hortago in waxyabaha dheeraad ah ay raacaan biyaha roobka.
- Adeegso qaababka biyaha tartiibta u socda (tusaale, tifiqda, dhururqda, iyo waraabinta qaybaha kala go'an leh) si aad u yarayso waraabinta xad dhaafka ah.
- Si sax ah u joogtee BMP yo kasta oo la adeegsaday. Badel ama kordhi BMP yada marka loo baahdo.

Jawaab celinta daadashada


- Aaga shaqada ee furan waa in la nadiifijo maalin kasta ayadoo la adeegsanaayo qaababka nadiifinta ee qalalan, sida xaaqista, tirtirista, haawinta, iyo sifaynta.
- Qaababka nadiifinta qoyan, sida biyaha tuubada, waa in keliya la adeegsadaa haddii taxadar la sameeyay si looga hortago in biyaha dhaqmada ama wasakhdu gasho nidaamka biyaha ama baraha biyaha.
- Iskuday inaad abuurto qorshaha jawaab celinta daadashada.
- U tababar shaqaalaha qaababka wanaagsan ee nadiifinta wasaqda.
- Xogta kale ee jawaab celinta daadashada ka fiiri Qaybta Waxyabaha Daata ee dhabarka danbe ee buuggaan tusmada.

***Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybaha Xeerka Ilaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego
67.806(a)(b)(d);67.808(a)(5);(a)(7)(A)(E);(a)(9).***

Dayactirka Barkada dabaasha, Spa, iyo Biyo Sayreyaasha

Qaab dhismeedka Goobta

- Ku kaydi kiimikooyinka barkada dabaasha, spa iyo fuuntooyinka gudaha ama meel daboolan.
- Ka dhig dhammaan aagaga maamulka, kaydka, iyo fogaynta wasakhda meel ka fog marinnda biyaha roobka ama kaydadka biyaha. Haddii aysan macquul ahayn, ka ilaali marinnda ama goobaha biyaha.



Fuunto biyaha saydha ayaa la nadiifiyya lana ilaaliyaa.

Sawirkha: Ismaamulka San Diego

Kaydka iyo Dayactirka Goobta

- Haku dhaqin kunteenarada dareeraha ama haku daadin wax dareere ah biyaha daadka ama goobaha biyuhu fadhiyan. Ku dhaq oo ku biyo raaci qasacyada keliya meel leh difaac ama siimanka leh tuubooyin la ogol yahay oo ku xiraaya nidaamka bulaacada.
- Biyaha barkada dabaasha, isbaaga, iyo fuuntada ayaa logu daadin karaa meelaha dhulka la falay keliya haddii aysan gaarayn nidaamka biyaha roobka ama goobaha biyaha.

Kaydka iyo Dayactirka Goobta

- Marna haku daadin biyaha wasaqda ah nidaamka biyaha daadka ama goobaha biyaha. Biyaha qashinka ah ayaa lagu shubi karaa nidaamka bulaacada qaada ama haanta bulaacada.
- Biyaha wasakhda ah ayaa logu daadin karaa meelaha dhulka la falay keliya haddii aysan gaarayn nidaamka biyaha roobka ama goobta biyaha.
- Si sax ah u joogtee BMP yo kasta oo la adeegsaday. Badel ama kordhi BMP yada marka loo baahdo.

Jawaab celinta daadashada

- Iskuday inaad abuurto qorshaha jawaab celinta daadashada.
- U tababar shaqaalaha qaababka wanaagsan ee nadiifinta wasaqda.
- Adeegso agabka biyaha dhuuqa iyo qaababka qalalan sida xaaqista, tirtirista, hawo gelinta, ama sifaynta waxyaabaha yaryar ee daata. Ku shub qashinka qasaca qashinka oo ku habboon.
- Xogta kale ee jawaab celinta daadashada ka fiiri Qaybta Waxyaabaha Daata ee dhabarka danbe ee buuggaan tusmada.

*Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybaha Xeerka Ilaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego
67.806(a)(b)(d);67.808(a)(5) ;(a)(6) ;(a)(7)(A) ;(a)(9)*

Aagaga La Maro



*Shabaq buluug ah ayaa la gashaa
meesha biyaha daadku maraan si
looga miiro qashinka iyo wasaqda.*

Sawirka: Ismaamulka San Diego

Kaydka iyo Dayactirka Goobta

- Difaac meelaha biyaha daadku maro (tusaale, adeegso jawaano ciid ah, miireyaasha, gidaarada biyaha dhuuqa, saliyo cinjir ah) gudaha ama aaga u dhow geesaha la maro ee wadada, meelaha lagu socdo, aagaga baakinka, wadooyinka, iyo geesaha wadada ee gaarigu istaago.
- Si sax ah u joogtee BMP yo kasta oo la adeegsaday. Badel ama kordhi BMP yada marka loo baahdo.
- Si joogto ah isha ugu haay biyaha daadka oo ka reeb qashinka, dhuuqeyaasha darbiga kasoo fuqay, jawaannada ciida ee dilaacay, ama miireyaasha marka loo baahdo.
- Nadiifi meelaha la maro adoo ka saaraaya qashinka, wasaqda, jaayga, iwm.
- Ilaali aaga la maro adoo dayactiraaya dilaacyada, duleelada, iwm.
- Geli baafafka wasaqda aruuriya hoosta gaari qoyaan ka daadenaayo.



*Marinka biyaha roobka
ayaa la difaacaan marka
la nadiifinaayo
meelaha la maro.*

*Sawirka: University of
California, San Diego*

Jawaab celinta daadashada

- Iskuday inaad abuurto qorshaha jawaab celinta daadashada.
- U tababar shaqaalaha qaababka wanaagsan ee nadiifinta wasaqda.
- Adeegso agabka biyaha dhuuqa iyo qaababka qalalan sida xaaqista, tirtirista, hawo gelinta, ama sifaynta waxyaabaha yaryar ee daata. Ku shub qashinka qasaca qashinka oo ku habboon.
- Xogta kale ee jawaab celinta daadashada ka fiiri Qaybta Waxyaabaha Daata ee dhabarka danbe ee buuggaan tusmada.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybaha Xeerka Ilaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego

67.806(a)(b)(d);67.808(a)(5) ;(a)(7)(A) ;(a)(9).

Aagaga Nasiinada iyo Dadwaynaha

Qaab dhismeedka Goobta

- Dhig aagaga nasiinada iyo dadwaynaha meelo har leh ama gudaha dhisme.



*Aagga nasiinada ayaa
kor ka daboolan si
joogto ah ayaana loo
nadiifiya loona
ilaaliya.*

*Sawirka: Ismaamulka
San Diego*

Kaydka iyo Dayactirka Goobta

- Ilaali oo nadiifi aaga nasiinada iyo goobaha dadwaynaha.
- Ka fogee qasacyada dib loo isticmaali karo marinnada biyaha daadka iyo goobaha biyaha.
- Dhig qasacyada ku filan ee qashinka adag iyo kan dib loo warshadayn karo goobo ku haboon.
- Si sax ah u calaamadee dhammaan kunteenarada qashinka iyo agabka dib loo warshadayn doono.
- Dabool dhammaan qasacyada qashinka iyo kuwa dib loo warshadaynaayo marka aan la isticmaalayn.
- Ka daadi qashinka kunteenarada qashinka iyo dib u warshadaynta ama hala qaado qashinka si joogto ah si looga hortago buux dhaafka.

Kaydka iyo Dayactirka Goobta

- Dayactir ama badel kunteenarada qashinka iyo dib u warshadaynta ee ciladu gashay. Nadiifi wax kasta oo ka dhasha qashinka ama dilaacyada.
- Si sax ah u maaree BMP yo kasta oo la adeegsaday sida gidaarada, xakabadaha, iyo difaacyada kale. Badel ama kordhi BMP yada marka loo baahdo.

Jawaab celinta daadashada

- Iskuday inaad abuurto qorshaha jawaab celinta daadashada.
- U tababar shaqaalaha qaababka wanaagsan ee nadiifinta wasaqda.
- Adeegso agabka biyaha dhuuqa iyo qaababka qalalan sida xaaqista, tirtirista, hawo gelinta, ama sifaynta waxyaabaha yaryar ee daata. Ku shub qashinka qasaca qashinka oo ku habboon.
- Xogta kale ee jawaab celinta daadashada ka fiiri Qaybta Waxyaabaha Daata ee dhabarka danbe ee buuggaan tusmada.

*Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybaha Xeerka Ilaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego
67.806(a)(b)(d); 67.808(a)(5) ;(a)(7)(A)(C)(E); (a)(9).*

Wax ku dhaqista Cadaadiska

Qaab dhismeedka Goobta

- Ku samee dhqista cadadiska adoo jooga meel daboolan.
- Wax ku dhaqista cadaadiska waa inaan la samayn xiliga dabaysha ama roobku jiraan.
- Ku samee dhammaan shaqooyinka dhaqista cadaadiska meelo kafog marinnda biyaha daadka ama goobaha biyaha. Haddii aysan macquul ahayn, si buuxda u ilaali marinnda ama goobaha biyaha.
- Ku samee dhammaan shaqooyinka dhaqista cadaadiska loo adeegsado aagga llaalinta leh ee loo asteeyay ama meel biyaha dhaqmada la qabanaayo ama la leexinaayo. Qaababka qabashada iyo leexinta bulaacada waxaa ku jiri kara: rako leh tuubooyinka bulaacada qaada, taangi wasaqda qabta, kala soocaha saliida/biyaha, BMP kale oo daawada xakameeya, ama tuubada ku xiraysa bulaacada oo sharci ah.
- Marka biyaha dhaqista ay ku kululaan karaan tuubooyinka bulaacada qaada, si joogto ah uga nadiifi waxyaabaha adkaha ah si aad uga hortagto buux dhaafka.



Biyaha dhaqmada waxaa lagu aruurshaa haawiye qoyan iyo jawaannada wasaqda dhuuqa.

Sawirka: Ismaamulka San Diego

Kaydka iyo Dayactirka Goobta

- Gasho dhammaan agabka nadiifinta, qasab gaar ah.
- Si sax ah u joogtee BMP yo kasta oo la adeegsaday. Badel ama kordhi BMP yada marka loo baahdo.

Jawaab celinta daadashada

- Iskuday inaad abuurto qorshaha jawaab celinta daadashada.
- U tababar shaqaalaha qaababka wanaagsan ee nadiifinta wasaqda.
- Adeegso agabka biyaha dhuuqa iyo qaababka qalalan sida xaaqista, tirtirista, hawo gelinta, ama sifaynta waxyaabaha yaryar ee daata. Ku shub qashinka qasaca qashinka oo ku habboon.
- Xogta kale ee jawaab celinta daadashada ka fiiri Qaybta Waxyaabaha Daata ee dhabarka danbe ee buuggaan tusmada.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybha Xeerka Ilaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego

67.806(a)(b)(d);67.808(a)(5) ;(a)(6) ;(a)(7)(A)(E) ;(a)(9).



Tijaabada iyo Dayactirka Dab damiska

Qaab dhismeedka Goobta

- Biyaha tijaabada dab damiska iyo dayactirka waa in lagu leexshaa nidaamka bulaacada ee la ogol yahay ama nidaamka qashinka biyaha.
- Biyaha tijaabada ayaa logu daadin karaa meelaha dhulka la falay haddii meesha dhulka la falay ah aysan gaarayn nidaamka biyaha roobka ama goobaha biyaha.



*BMP ga sifeeyaha
dab damiska ayaa
laga miiraa busta iyo
sunta kale inta la
tijaabinaayo.*

*Sawirka: Ismaamulka
San Diego*

Kaydka iyo Dayactirka Goobta

- Haawi biyaha kor jira kahor intaadan la bixin llaalinta biyaha daadka.
- Si sax ah u maaree BMP-yo kasta oo la adeegsaday sida gidaarada, xakabadaha, iyo difaacyada kale. Badel ama kordhi BMP yada marka loo baahdo.

Jawaab celinta daadashada

- Iskuday inaad abuurto qorshaha jawaab celinta daadashada.
- U tababar shaqaalaha qaababka wanaagsan ee nadiifinta wasaqda.
- Adeegso agabka biyaha dhuuqa iyo qaababka qalalan sida xaaqista, tirtirista, hawo gelinta, ama sifaynta waxyaabaha yaryar ee daata. Ku shub qashinka qasaca qashinka oo ku habboon.
- Xogta kale ee jawaab celinta daadashada ka fiiri Qaybta Waxyaabaha Daata ee dhabarka danbe ee buuggaan tusmada.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybaha Xeerka llaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego

67.806(a)(b)(d);67.808(a)(5);(a)(6);(a)(7)(A);(a)(9).

Meelaha Ciidu Nabaad Guuri karto iyo Aagaga Dhismaha

Qaab dhismeedka Goobta

- Iska ilaali inaad shaqooyinka dhismaha ka samayso goobaha ciidu nabaad guuri karto inta lagu jiro xili dabayleedka ama roobaadka si loo yareeyo qashinka dabayshu qaadi karto iyo nabaad guurka jaayga.
- Ka leexi biyaha kasoo dareera meelaha ciidu guuri karto iyo meelaha dhismuhu ka socdo ama kasoo deganaaya dagaandaga biyaha roobka ama goobaha biyaha. Haddii aysan macquul ahayn, ka ilaali marinnda ama goobaha biyaha.



*Tuurka ciida waxaa
lagu daboolaa gidaar,
uu gaashaan u yahay
duubabka fibarka, iyo
jawaano ciid ah.*

*Sawirkha: Michael
Baker International*

Kaydka iyo Dayactirka Goobta

- Xakamee dhammaan qashinka iyo jaayga ka yimaada meelaha ciidu guurayso iyo meelaha dhismuhu ka socdo.
- Dabool oo xakamee dhammaan tuurarka marka aan la isticmaalayn.
- Yaree busta iyo jajabka adoo yaraynaaya xawaaraha gaariga maraaya meelaha aan llaalinta lahayn iy adoo biyo yar ku firdhinaaya wadooyinka, luqda, iyo aagaga dhismaha.

Kaydka iyo Dayactirka Goobta

- Adeegso xashka alwaaxa, saliyada iyo busteyaasha ka hortaga nabaad guurka, jawaannada ciida, duubabka fibarka, jawaannada ciida ama jaayga si looga hortago nabaad guurka iyo rarista jaayga.
- Ka difaac beeraha horay u jiray shaqooyinka dhismaha.
- Geedo cusub ku beer meelaha la xaaqay si aad u yarayso ciida guuraysa.
- Si sax ah u joogtee BMP yo kasta oo la adeegsaday. Badel ama kordhi BMP yada marka loo baahdo.

Jawaab celinta daadashada

- Iskuday inaad abuurto qorshaha jawaab celinta daadashada.
- U tababar shaqaalaha qaababka wanaagsan ee nadiifinta wasaqda.
- Adeegso agabka biyaha dhuuqa iyo qaababka qalalan sida xaaqista, tirtirista, hawo gelinta, ama sifaynta waxyaabaha yaryar ee daata. Ku shub qashinka qasaca qashinka oo ku habboon.
- Xogta kale ee jawaab celinta daadashada ka fiiri Qaybta Waxyaabaha Daata ee dhabarka danbe ee buuggaan tusmada.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybaha Xeerka Ilaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego

67.806(a)(b)(d);67.808(a)(5) ;(a)(7)(A) ;(a)(9)(A)(B).

Dusha sare ee Saqafka



*Haawinta qoyaanka
iyo jawaannada
qoyaanka dhuuqa
ayaa loo adeegsadaa
si biyaha dhaqmada
looga qaado saqafka.*

*Sawirka: Ismaamulka
San Diego*


Kaydka iyo Dayactirkha Goobta

- Ku leexi biyaha minjaroorada yimaada saqafka iyo biyo kasta oo ka yimaada dhaqmada saqafka meelaha dagaandega leh, sida dhulka kala sareeya ee la falay.
- Iska ilaali inaad qasacyada wax ku jiraan saarto saqafka.
- Nadiifi dusha sare ee saqafka iyo minjaroorada oo ilaali.
- Xakamee oo si sax ah qashinka ugu dar wasaqda ka timaada nadiifinta ama dayactirkha.
- Si joogto ah uga saar wasaqda, qashinka, iyo qurunka dusha saqafyada iyo minjaroorada.

Jawaab celinta daadashada

- Iskuday inaad abuurto qorshaha jawaab celinta daadashada.
- U tababar shaqaalaha qaababka wanaagsan ee nadiifinta wasaqda.
- Adeegso agabka biyaha dhuuqa iyo qaababka qalalan sida xaaqista, tirtirista, hawo gelinta, ama sifaynta waxyaabaha yaryar ee daata. Ku shub qashinka qasaca qashinka oo ku habboon.
- Xogta kale ee jawaab celinta daadashada ka fiiri Qaybta Waxyaabaha Daata ee dhabarka danbe ee buuggaan tusmada.

*Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybaha Xeerka Ilaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego
67.806(a)(b)(d);67.808(a)(5) ;(a)(7)(A) ;(a)(9)(D).*



Nidaamyada Biyaha Daadka Qaada



*Godadka kala xiran
ayaa loo adeegsadaa
aqoonsiga meelaha
daadku u socdo.*

*Sawirka: Ismaamulka
San Diego*

Kaydka iyo Dayactirkha Goobta

- Sjoogto ah uga saar qashinka, wasaqda, iyo xashka geedaha marinnaada iyo wadiiqooyinka biyaha roobka.
- Si sax ah u joogtee BMP yo kasta oo la adeegsaday. Badel ama kordhi BMP yada marka loo baahdo.
- Kahortag qashinka banaanka u baxa inta aad wado nadiifinta iyo dayactirkha BMP.
- Ka ilaali wasaqda sunta ah iyo tuubooyinka kale si aysan u gelin nidaamka biyaha robka iyo goobaha biyaha. Tuubooyinka sunta ayaa la bixin karaa isla markaba.
- Kala xir marinnaada biyaha roobka oo ku dhaji boorar mammuucaaya in wasaq sharci dero ah ama qashin lagu shubo. Ku qor magaca warta biyuhu ku dhacayaan dhammaan boorarka.
- Si sax ah u xaree kadibna qashinka ugu dar biyaha wasaqda ah ee ka yimaada shaqada nadiifinta.
- Si joogto ah uga fiiri biyaha daadka wasaq ama cadaynta qashin ama bulaacad sharci dero ah.


Kaydka iyo Dayactirka Goobta

- Si sax ah u joogtee BMP yo kasta oo la adeegsaday. Badel ama kordhi BMP yada marka loo baahdo.
- Kormeer ku samee meelaha biyaha daadku galaan kahor intaan la gaarin xili roobaadka iyo kadib marka roobku da'o si aad uga eegto xash isku gooyay. Dayactir ku samee waxyeelo kasta oo ku dhacay meesha.

Jawaab celinta daadashada

- Adeegso agabka biyaha dhuuqa iyo qaababka qalalan sida xaaqista, tirtirista, hawo gelinta, ama sifaynta waxyaabaha yaryar ee daata. Ku shub qashinka qasaca qashinka oo ku habboon.
- Xogta kale ee jawaab celinta daadashada ka fiiri Qaybta Waxyaabaha Daata ee dhabarka danbe ee buuggaan tusmada.

*Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybaha Xeerka Ilaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego
67.806(a)(b)(d); 67.808(a)(5) ;(a)(7)(A)(C)(E); (a)(9).*



Shaqooyinka Guud ee Degaannada la dagan yahay

Doomaha iyo Gaariyaasha

Dayactirka iyo Ilaalinta Gaadiidka iyo Doomaha

- Ku haay gaariyaasha iyo doomaha meelo kafog marinnada biyaha daadka ama goobaha biyaha. Haddii aysan macquul ahayn, ka ilaali marinnada ama goobaha biyaha.
- Ku samee dhammaan shaqooyinka dayactirka iyo ilaalinta gaariga gudaha, gaar ahaanna xiliga robku da'aayo. Haddii banaanka lagu sameeyo ku samee meel kor daboolan iyo aag si buuxda u xakamaysan taasoo kahortagaysa daadka iyo biyaha roobka.
- Geli baafka qashinka hoosta gaariyaasha ama qalabka marka aad dayactirayso iyo marka aad kaydinayso.
- Ha uga tagin baafafka qashinka ama kunteenarada furan oo dheecaanku ku jiro ayagoo meesha yaala. Si joogto ah qashinka dareeraha ku shub sifeeyaha ama qashinka ku habboon ku dar.
- Xaqijji in biyaha kasoo daata dufan dhaqa ama cadaadis dhaqa matoorada iyo qaybaha kale la xakameeyo si sax ahna qashinka loo raacsho si waafaqsan sharciyada iyo xeerkarka ay qusayso.
- Geli gaariyaasha iyo agabka matoorada iyo qashinka ka dhasha gudaha, meel daboolan, ama kunteenaro amaan ah oo aysan biyuhu geli karin.
- Qalabka iyo agabka muhiimka u ah kahortaga daadashada dareerayaasha gaariga iyo doomaha waa in la ilaaliyaa ayna markasta diyaar ahaadaan.
- Adeegso agabka wax dhuuqa iyo qaababka qalajinta si aad u nadiifiso waxyaabaha daata. Isla markaba qashinka ugu dar si sax ah waxyaabaha la adeegsaday.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybta Xeerka Ilaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego 67.807(a).

Gaari Dhiqista

- Ku dhaq gaariyaasha keliya meelaha llaalinta leh ee loo sameeyay ama qaab biyaha wasaqda ah la qabanaayo ama lagu leexinaayo meelaha cawska leh, aaga jaayga ah, ama tuubada bulaacada.
- Ku xaree iskudarka nadiifinta oo kasta ama dufanka laga daadsho matoorada kunteenaro yaala gudaha dhismaha. Dib u adeegso maadooyinka kasta oo la adeegsaday.
- Adeegso agabka wax dhuuqa iyo qaababka qalajinta si loo nadiifiyo waxyaabaha daata. Isla markaba qashinka ugu dar si sax ah waxyaabaha la adeegsaday.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybta Xeerka llaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego 67.807(b).

Baakinka gaariyaasha

- Dhig gaariyaasha meel ka fog marinnda biyaha ama goobaha biyaha. Haddii aysan macquul ahayn, ka ilaali marinnda ama goobaha biyaha ee u dhow ama ka hooseeya dagaandaga aagaga baakinka gaariga.
- Kor u qaad oo dabool dhammaan aagaga banaanka ee gaariga, qalabka, iyo kaydka qaybaha qalabka (tusaale, u samee daboollada dusha sare ama adeegso meelo kor ah).
- Adeegso baafafka dareeraha ama qaababka kale ee qabka waxyaabaha daata si looga hortago dareeraha qashinka ah inuu gaaro marinnda biyaha roobka ama goobaha biyaha.
- Adeegso agabka wax dhuuqa iyo qaababka qalajinta si loo nadiifiyo waxyaabaha daata ee saliida iyo dufanka. Isla markaba qashinka ugu dar si sax ah waxyaabaha la adeegsaday.

*Fadlan ka eeg sharchiyada maxaliga ah ee aagaynta iyo Waxaha Dhismaha kahor intaadan dhisin daboolka kore.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybta Xeerka llaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego 67.807(c).

Nashaadaadka Banaanka

Maamulka Sunta Cayayaanka, Geedaha Cayayaanka, iyo Bacrimiyaasha beeraha



*Mulkiiлаа guri
isticmaalaaya aalada
buufisa daawada
cayayaanka ee
tartiibta u shaqeeya.*

*Sawirka: Michael
Baker International*

- Kahortag daadashada, dilaacyada, iyo adeegsiga xad dhaafka ah ee maadooyinka kiimikada inta lagu jiro shaqooyinka falista hagaajinta dhulka.
- Ka fakar cimilooyinka jira iyo jadwallada waraabinta kahor intaadan banaanka ku shubin bacrimiyaasha iyo sunta cayayaanka.
- Ha marinin bacrimiyaasha iyo sunta cayayaanka inta lagu jiro xiliyada dabayshu jirto ama kahor xiliga waraabka iyo roobka.
- Ku haay kunteenarada maadooyinka xaaland wanaagsan, adoo si fiican u xiraaya marka aan la isticmaalayn, una kaydinaaya qaab ka difaacaaya inay taabtaan biyaha daadka.

- U adeegso una fogee daawada cayayaanka, bacrimiyaasha, iyo maadooyinka kiimikada si waafaqsan tilmaamaha ku qoran maadada, Xaashida Badqabka Xogta (SDS, oo horay loo oran jiray MSDS), iyo sharchiyada iyo xeerarka khuseeyaa federaalka, gobalka, iyo kuwa maxaliga ah.
- Diyaarso alaabaha iyo qalabka lagu xakameeyo waxyabaha daata oo dhigo meel aad degdeg ugasoo qabsan karto.
- Ku nadiifi waxyabaha daata agabka qoyaanka dhuuqa iyo qaababka qalajinta (tusaale, tirtirsta). ISi sax qashinka ugu dar si sax ah waxyabaha la adeegsaday.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybta Xeerka Ilaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego 67.807(d).



Daryeelka iyo Dayactirka Guriga



*Mulkiiлаha guri
adeegsanaaya gogol
adag oo uu hoos
gashay caleenta si ay
ugu fududaato inuu
xashka caleenta
meesha ka guro.*

Sawirkha: Michael
Baker International

- Adeegso baco, difaacyo, ama dhar geli hoosta rastoo yinka qashinka geedaha ee ku meel gaarka ah si aad u fududayso qaadista qashinka geedaha iyo kan adkaga ah ee ka yimaada aaga.
- Ku xaree wasaqda geedaha iyo adkaha ah gudaha iyo hoosta meel daboolan.
- Dabool saar dhammaan kunteenarada qashinka geedaha iyo kuwa adkaha ah (qasacyada qashinka, goobaha qashinka, qasacyada birta ah, iwm.) oo dabool marka aan la isticmaalayn.
- Ku nadiifi qalabka riinjiga aag difaac leh ama siin leh tuubooyinka sharciga ah ee gaynaaya qashinka nidaamka bulaacada.
- Geli agabka khatarta ah ee guriga kunteenaro xiran ama leh magucu ku qoran yahay. Ku xaree gudaha ama hoosta meel daboolan.
- Adeegso agabka wax dhuuqa iyo qaababka qalajinta si loo nadiifiyo waxyaabaha daata iyo adkeyaasha khatarta ah. Isla markaba qashinka ugu dar si sax ah waxyaabaha la adeegsaday.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybta Xeerka Ilaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego 67.807(e).

Maamulka Qashinka iyo Wasaqda Xoolaha

- Ka dhig dhammaan aagaga maamulka, kaydka, ama fogaynta wasaqda iyo qashinka xayawaannada rabaayada ah meel ka fog marinnada biyaha roobka ama kaydadka biyaha. Haddii aysan macquul ahayn, ka ilaali marinnada ama goobaha biyaha.
- Ku xaree wasaqda iyo qashinka xayawaannada rabaayada ah meel daboolan.
- Meelaha la gasho wasaqda iyo qashinka xayawaannada rabaayada ah waa in laga fogeeyaa marinnada biyaha adoo adeegsanaaya difaacyo geedo lagu beeray ama daaqa si ay u noqdaan miireyaal dabiici ah.
- Si looga hortago faafida iyo daad raaca qashinka, ku kaydi wasaqda iyo qashinka xayawaannada rabaayada ah meelo adag, aysan geli karin cayayaanku, oo aan daadanayn oo leh sal adag (sida, qasacyada caaga ah ee qashinka oo leh dabool, weelasha aysan cayayaanku geli karin ama shubka ah ee lagu kaydiyo qashinka, godad ama tarajeeyo lagu daboolay lakbyo caag ah).
- Nadiifi qashinka xayawaannada yaryar (tusaale, eeyada iyo biisadaha) ugu yaraan asbuuc kasta oo ku rid qasac daboolan ama ku falaash musqusha.
- Nadiifi qashinka xoolaha, fardaha, ama xayawaannada kale ee waawayn ugu yaraan 2 jeer asbuucii. Bacrimi ama qashinka ku rid qasaca qashinka oo daboolan.
- Kahortag buux dhaafka aagaga qashinka iyo wasaqda xayawaannada iyo kunteenarada adoo xaqijinaaya in qashinka la qaado lana fogeeyo qashinka iyo wasaqda la gubay.
- Adeegso qaababka qalalan si aad u nadiifiso qashinka xayawaanka rabaayada ah ama wasaqda daatada iyo qashinka sida aruurinta ama xaaqida.



*Mulkiiлаha eeyga oo ku
qaadaaya wasaqda eeyga
bac si sax ah loogu dari
doono qashinka.*

*Sawirka: Michael
Baker International*


*Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybta Xeerka Ilaalinta
Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego 67.807(f).*

Shaqooyinka la Xariira

Marinnada Gaarka ah ee Bulaacada iyo Nidaamyada

- Nadiifi, ilaali, oo dayactir duleelada gaarka ah ee buaacada si aad uga hortagto awdanka iyo daadasha.
- Qasacda ka daadi nidaamka buaacada biyaha adoo raacaaya jadwalka dayactirka joogtada ah.
- Adeegso agabka wasaqda dhuuqa iyo qaababka qalajinta si aad u nadiifiso Aadna u xakamayso waxyaabaha ka daata shabaqyada buaacada iyo nidaamyada wasakhda biyaha ee goobta.
- Si sax ah oo degdeg ah qashinka ugu dar agabka la isticmaalo ee ka yimaada nadiifinta waxyaabaha daata.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybta Xeerka Ilaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego 67.807(g).



Daadka biyaha Waraabka beerka



*Biyo fidiye ayaa
keliya biyaha ku
buufinaaya aaga
dhulka la falay*

- Wax ka badal buufiyaasha si aysan biyaha ugu firdhin wadooyinka iyo geesaha wadada.
- Dayactir meelaha dilaaca ama buufiyaasha jabay.
- Ku warabi mareeg gaaban (3–5 daqiiqo) si aad ugu ogolaato biyaha inay ciidu liqdo.
- Ku badal geedaha waraabka badan raba geedaha abaarta u adkaysta ama kuwa deegaanka.
- Ku dar xash aaga wasaqda banaan si uu uga dhuuqo biyaha uuna uga hortago inay qulqulaan.
- Gedaha gacanta ku warabi si aad u xaqijiso in mid kasta helo cadadka saxda ah ee biyaha.
- Isku meel iskugu gee geedaha u baahan waraabka isku mid ka ah una qaabee aaga waraabka si ku haboon si looga hortago biyo ka badinta geedaha.
- Wax ka badel jadwallada waraabinta xiliyada roobku da'aayo (Oktoobar—Abriil).
- Warabi subixii ama fiidkii si aad u yarayso cadadka biyaha loogu baahan yahay in ciidu liqdo.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybta Xeerka Ilaalinta Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego 67. 807(d).

Maamulka Barkada dabaasha, Spa, iyo Biyo Sayreyaasha

- Ku kaydi kiimikooyinka barkada dabaasha, spa, iyo fuuntooyinka gudaha ama meel daboolan.
- Ku dhaq oo ku biyo raaci qasacyada dareeraha keliya meel leh difaac ama siimanka leh tuubooyin la ogol yahay oo ku xiraaya nidaamka bulaacada.
- Ku shub biyaha dabaasha, biyaha wax lagu dhaqay, iyo biyaha wasaqda ah tuubada bulaacada. La xariir wakaaladaada bulaacada si aad u waydiiso shuruudaha xadidaada iyo waxyaabaha mamnuuca ah.
- Biyaha dabaasha, spa, ama fuuntada ayaa lagu leexin karaa nidaamka biyaha roobka qaada haddii:
 - Biyaha lagusoo koobay wax ka yar 1 qayb halkii milyan ba (ppm) oo koloriin ama bromine.
 - Biyaha aysan ku jirin sunta kale sida sunta cayayaanka, waxyaabaha aashitada dhaqa, ama heeraka sare ee maadada salinity.
 - Biyuhu aysan keenayn nabaad guurka ciida.
- Biyaha barkada dabaasha, spa, iyo fuuntada ayaa logu daadin karaa meelaha dhulka la falay keliya haddii dhulka la falay aysan gaarayn nidaamka biyaha roobka ama goobaha biyaha.



Biyaha spa ee lagu shubay aaga la falay.

Sawirkha: Michael Baker International

- Narna haku daadin biyaha wasaqda ah nidaamka biyaha daadka iyo goobaha biyaha. Biyaha qashinka ah ayaa lagu shubi karaa nidaamka bulaacada qaada ama haanta bulaacada.
- Biyaha wasakhda ah ayaa lagu daadin karaa meelaha dhulka la falay haddii meesha dhulka la falay ah aysan gaari karin carruurta ama rabaayaduhu aysana gaarayn nidaamka biyaha roobka ama goobaha biyaha.
- Si joogto ah u nadiifi dabaasha, spa, iyo fuuntada oo ku hay kiimikooyinka heerarka saxda ah si aad uga hortagto in algae ku faafsto.
- Qalabka iyo agabka muhiimka u ah kahortaga daadashada waa in la ilaaliyaa ayna markasta diyaar ahaadaan. Shaqsyaadka qaybta ka ah kahortaga daadeshada waa in la siiyaa tababar sax ah.
- Adeegso agabka wax dhuuqa iyo qaababka qalajinta si loo nadiifijo waxyaabaha daata. Isla markaba qashinka ugu dar si sax ah waxyaabaha la adeegsaday.



*Mulkiilaha guriga
adoo adeegsanaaya
agabka biyaha
dhuuqa si uu qaab
sax ah ugu nadiifijo
biyaha daatay.*

*Sawirka: Michael
Baker International*

*Si aad u hesho xog dheeraad ah, ka fiiri Qaybta Xeerka Ilaalinta
Harka Biyaha ee Ismamaulka San Diego 67.808(a)(6)(I)(J)(K).*



Xogta Muuqaalka ah

Inspecting Your Business (Kormeer Ganacsigaaga)

Ingiriis- <https://www.youtube.com/watch?v=JNLa8ohzINI>

Isbaanish- <https://www.youtube.com/watch?v=by4CIF7GU9U>

Hazardous Waste Disposal (Fogaynta Qashinka Katarta ah)

https://youtu.be/8cBHZQTZ2Ac?list=UU49Dqql8Pbh5mOy_lsg0q7Q

Contain and Clean up Spills (Xakamee oo Nadiifi

Waxyaabaha Daata)

https://youtu.be/HA3gdWNpVoU?list=UU49Dqql8Pbh5mOy_lsg0q7Q

Landscape Erosion Control (Xakamaynta Nabaad Guurka Ciida)

https://youtu.be/_l8LgNJZigs?list=UU49Dqql8Pbh5mOy_lsg0q7Q

Irrigation Repair (Dayactirka Warabaka)

https://youtu.be/M3YfX5_HqYg?list=UU49Dqql8Pbh5mOy_lsg0q7Q

Irrigation Controllers and Timers (Xakameeyaasha iyo Waqt
sheegayaasha Beeraha)

https://youtu.be/h9hO9z8rtRY?list=UU49Dqql8Pbh5mOy_lsg0q7Q

Draining Pools and Spas (Biyo ka Shubida Barkadaha Dabaasha
iyo Spa)

https://youtu.be/9Wd5yAozP-Q?list=UU49Dqql8Pbh5mOy_lsg0q7Q

Barkadaha Dabaasha Bii'ada u roon

https://youtu.be/mKW5UU_qzbc?list=UU49Dqql8Pbh5mOy_lsg0q7Q

Liiska Buuxa ee Maqaayadaha

<https://www.youtube.com/user/projectcleanwaterwpp/videos>



Waxyaabaha daata

- Adeegso kiishadaha waxyaabaha daata si aad u sifayso waxa daata.
- Diyaarso alaabaha iyo qalabka lagu xakameeyo waxyaabaha daata oo dhigo meel aad degdeg ugasoo qabsan karto.
- Adeegso agabka biyaha dhuuqa iyo qaababka qalalan sida xaaqista, tirtirista, hawo gelinta, ama sifaynta waxyaabaha yaryar ee daata. Ku shub qashinka qasaca qashinka oo ku habboon.
- Si degdeg ah u nadiifi waxyaabaha waawayn ee daata iyo meelaha dhashuumaya. U fogee qashinka soo baxa si waafaqsan sharciyada iyo xeerarka quseeyya.
- Waxyaabaha badan ee daata oo laga yaabo inay wasaqda toos u gaarsiiyaan nidaamka biyaha daadka ama goobaha biyaha waa in si badqab leh loogu sheego wakaaladaha ismaamulka ee ay khuseyso:
 - **Waxyaabaha daata Agabka Khatarta** ee keeni kara dhibaatooyinka ka baxsan meesha waa in loo sheego Waaxda Caafimaadka Bii'ada, Ismaamulka San Diego oo aad ka helayso (858) 505-6673 inta lagu jiro saacadaha shaqada. Saacado kadib wac 911.
 - **Waxyaabaha kale ee daata** ee keeni kara dhibaatooyinka ka baxsan meesha waa in loo sheegaa Waaxda Shaqooyinka Bulshada, Barnaamijka Ilaalinta Harka Biyaha oo laga wacaayo (888) 846-0800.

Agabka wasaqda dhuuqa – Waa agabka qaada oo qabta dareeraha keenaaya in sheeygu uro. Tusaaleyaasha waxyaabaha wasaqda dhuuqa waa roogaga, qashin aruuriyaha, ama ciida. Kadib marka aad marsiso aalada wasaqda dhuuqda, sug inta sheeygu ka dhuuqaayo dareeraha kadibna xaaq sheeyga si aad ugu darto qashinka.

Gidaarka – Darbi siman oo dhul ah, tuur ah, ama difaac aburaaya xijaab.

Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka – Shaqooyinka la sameeyo si looga hortago ama loo yareeyo wasakhda waxyaabaha sunta ah ee galaaya biyaha daadka, nidaamka biyaha roobka qaada ama biyaha qabta.

Biyaha Bulaacada – Biyo wasaq ah oo ku aruura saqafka hoose.

Qaababka Nadiifinta ee Qalalan – Farsamooyinka nadiifinta waxyaabaha daata ee aan qusayn adeegsiga biyaha. Qaababka ugu badan waa xaaqinka, wax tirtirista, sifaynta, ama haawinta.

Xakamaynta Banaanka – Xakamaynta dareereyaasha si looga hortago wasaqaynta ciida iyo biyaha. Farsamooyinka guud waxaa kamen ah adeegsiga gidaarada daadka si loo xakameeyo qalabka saliida leh, taangiyada shidaalka, goobaha lagu dhaqo taraaga, ama meelaha kale ama agabka ay ka daadan karaan dareereyaashu.

Shabaqyada Bulaacada – Tuubada ku xirta tuubada gudaha laynka wayn ee bulaacada.

Kiishada waxyaabaha daata – waxay ku celisaa waxa daata meel gaar ah si aysan uga bixin dhismaha ama aysan u gelin biyaha daadka.

Istiraashada Waxa daata – Agabka xakameeya waxyaabaha daata oo loo sameeyay inuu biyaha daatay celiyo.

Godka – Duleel ama god dareeruhu ku aruuro.

Harka biyaha - Aag dhul ah oo soo aruursha dhammaan biyaha roobka ee gudaheeda ku dhaca kadibna geeya barkada wayn ee biyaha sida baliga, harada ama bad waynta. Dhulka oo dhan ayaa ah harka biyaha.

Xeerkal Ilaalinta Harka Biyaha - Sharciyada iyo xeerarka maamula shaqooyinka biyaha daadka ee deegaannada miyiga ee Ismaamulka San Diego.

